



11 September 2012

HANNAANKA IYO HABRAACA DIIWAANGELINTA URURRADA SIYAASADEED EE PUNTLAND

1. Guddiga Doorashooyinka ee KMG ayaa ka masuul ah qabashada araaajida diiwaan-gelinta ee ururada siyaasada iyo xafidaada dukumantiyada ay u soo gudbiyaan ururradu.
2. Guddiga Doorashooyinka ee KMG waxay ku baahinaysaa warbaahinta dalka bilowga muddada qabashada codsiyada diiwaangelinta ururrada siyaasadeed oo ka bilaabanaysa **11Ka September 2012.**
3. Wakhtiga kama danbeysta ah ee la qabaanyo araaajida waa 05:00 Galabnimo ee maalinta ugu danbeysa qabashada araaajida oo ah **10 December 2012.**
4. Foomka qabashada araaajida waa inuu saxiixo madaxa ururku waxana lagu soo ridayaa labo bushqadood oo ay korka ka qoran yihiin Asal iyo nuqul.
5. Muddada Qabashada Codsiyada Diiwaan galintu waa saddex bilood oo ka bilaabanta maalinta **11 Sep 2012.**
6. Urur kasta oo doonaya in loo diiwaangeliyo urur siyaasadeed waa inuu ku soo qortaa arji foomka loogu talagalay, kuna soo hagaajiyaa Guddiga isagoo arjiga ku lifaaqaya caddaymaha iyo qoraalada soo socda:-
 - a. 10 Nuqul oo daabacan oo ah xeerka ururka .
 - b. Liiska magacyada aassaasayaasha ururka.

- c. Liiska Assaasayaasha Ururka iyo Xeerka ururka waa in lagu soo hor saxiixaa Nootaayo sharciiyeysan.
 - d. Liiska magacyada Golaha Dhexe ee Ururka.
 - e. Caddeyn maqal iyo muuqaal ah oo muujinaysa goortii iyo goobtii ururku ku qabtay shirkii assaaska ururka ee ugu horeeyay.
 - f. Liiska Magacyada Guddida fulinta ee Ururka
 - g. Qaab-dhismeedka ururka oo ay ku caddahay magaca ururka oo dhan iyo habka uu u qormayo marka la soo gaabiyo, calaamadaha ururka iyo hal-ku-dheggiisa.
 - h. Cinwaanka ururka oo dhamaystiran sida: Telephone, Emailka, Xafiiska ururka, IWM.
 - i. Caddeyn bixin deebaaji dhan **\$ 15,000** (shan iyo toban kun oo Dollar) oo aan celis lahayn, waxaana lagu shubayaa bangiga dhexe ee dawladda Puntland.
 - j. Magacyada 2 qof oo xirriiriyaal ah iyo cinwaannadooda (Telephone iyo Email)
7. Waxaa laga rabaa urur kasta inuu guddiga doorashooyinka ka hubiyo in magacaiyo astaanta uu wato aan urur kale horey u qaadan.
8. Waxaa araajida lagu soo hagaajinayaa xarunta dhexe ee Guddiga Doorashooyinka Puntland oo ku taala Magaalada Garoowe ka soo horjeedka Xarunta Diakonia. Foomamka waa in la keeno xarunta dhexe ee Guddiga. Waxa uu Guddigu siinayaa urur kasta markuu keeno araajida caddeyn muujinaysa ka qabashada arjiga. Waxaa kaloo ururka ku waajib ah inuu qaato caddeynta.
9. Waxaa lagu wargelinayaa ururrada inay araajidooda ku keenaan muddada loo cayimay.
10. Urur/xisbi kasta waa inuu xubin ka noqon karo qof kasta oo ah muwaadin Puntland ah.
11. Urur/xisbi kasta oo siyaasadeed waa in xeerkiisa ku caddahay ku dhaqanka dimoqraadiyadda iyo talo-wadaagga, hogaamintuna ay ku timaadaa doorasho xor ah.

12. Urur/xisbi kasta waa in xeerarkiisu waafaqsan yahay shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka kale Puntland.
13. Araajida iyo lifaaqyada la socoda waa dukumantyo ummadded (Public document). Guddigu wuxuu xaq u leeyahay inuu weydiisto madax aururka wixii macuulmaad dheeraad ah ee uu u baahdo.
14. Xoghayaha Guud ee Guddiga, ama xubin ka tirsan GDPee KMG oo Guddigu u idmado marka uu maqanyhay xoghayaha guud ayaa ka qabanaya ururrada araaajida.
15. Mudada u dhexaysa **11Dec 2012 ilaa 10 Feb 2013** waxaa loo qondeeyay in guddigu sameeyo hubin ururku inuu buuxiyay shuruudaha ku qoran xeerka ururada/ xisbiyada siyaasadeed ee Dawladda Puntland. shuruudaha lahubinayo waa:
 - a. Goortii iyo goobtii ururku ku qabtay shirkii golaha dhexe ee ugu horeeyay ururka. Caddeyn maqal iyo muuqal ah oo muujinaysa qabashada shirka golaha dhexe iyo qaabkii loo doortay hogaanka ururka.
 - b. Liiska ciwaanada xarumaha ururka ee gobolada iyo degmooyinka dalka.
 - c. Liiska taageerayaasha ururka ee gobolada Puntland oo dhan, gobol walba waxaa laga rabaa ugu yaraan 300 oo taageerayaal ah waana inay buuxiyaan shuruudaha codbixinta.
16. Sida ku qoran Dastuurka Puntland waxaa reeban ururada iyo xisbiyada leh muuqaal ciidan ama qabiil.

Guddiga Doorashooyinka Puntland ee KMG.

Xarunta Dhexe ee Guddiga